# YAA GO'AANSANAYA?

## WEYDIIMO KU SAABSAN XUQUUQAHA, KHATARTA, IYO DARYEELKA.

Aayo ka tashiga, Sharafta Khatar Qaadashada, iyo Waajibaadka Daryeelka waxay u shaqeeyaan si wadajir ah, inta badanna way is-dul-saarmaan nolosha dhabta ah. Akhri xaalad kasta oo dooro fikradda ugu fiican.

**Aayo ka Tashiga** micnihiisu waa dadka waxay samayn karaan doorashooyin ku saabsan waxa ay rabaan iyo waxa muhiimka u ah.

**Sharafta Khatar Qaadashada** micnaheedu waa dadka waxay xaq u leeyihiin inay isku dayaan waxyaabo cusub, sameeyaan khaladaad, ayna qaataan khataro.

**Waajibaadka Daryeelka** micnihiisu waa shaqaalaha dadka taageerada bixiya waa inay qaadaan tallaabooyin macquul ah oo lagu ilaalinayo badbaadada dadka.

1. **Maariya waxay rabtaa inay keligeed noolaato. Kooxdeeda taageerada waxay Maariya waydiiyeen nooca guriga ay rabto iyo caawimaadda ay u baahan karto. Kooxdu waxay qadarinayaan xagga Maariya...**

   A) Aayo Ka Tashiga
   B) Sharafta Khatar Qaadashada
   C) Waajibaadka Daryeelka

2. **James wuxuu arkay meesha jaraanjarada la qabsado oo ka dabacsan guriga macmiil. Wuu ka warbixiyay wuxuuna xaqiijiyay in la hagaajiyo. James wuxuu ku dhaqmayaa...**

   A) Aayo Ka Tashiga
   B) Sharafta Khatar Qaadashada
   C) Waajibaadka Daryeelka

3. **Keisha waxay rabtaa inay aaddo ballan shukaansi. Qoyskeeda waxay ka walwalayaan in dareemadeeda wax loo dhimo. Keisha way ogtahay balse weli waxay rabtaa inay isku daydo ballanta shukaansiga. Xageeda waxaasi waa...**

   A) Aayo Ka Tashiga
   B) Sharafta Khatar Qaadashada
   C) Waajibaadka Daryeelka

4. **David wuxuu rabay inuu helo shaqo, uu barto inuu raaco baska, oo uu wakhti badan la qaato saaxiibada. Kooxdiisa taageerada waxay ka caawisay inuu samaysto qorshe uu ku gaaro yoolalkiisa. Kooxdu waxay ixtiraamtay xuquuqda David ee...**

   A) Aayo Ka Tashiga
   B) Sharafta Khatar Qaadashada
   C) Waajibaadka Daryeelka

5. **Paula, oo isticmaasha kursiga naafada, waxay rabtaa inay keligeed aaddo bannaanka. Daryeelaheeda wuxuu arkay in dallacaadeeda uu daboolay baraf. Waxay xaaqeen barafki ka hor inta aysan Paula aadin bannaanka. Daryeelaha wuxuu u fulinayaa...**

   A) Aayo Ka Tashiga
   B) Sharafta Khatar Qaadashada
   C) Waajibaadka Daryeelka

**6. Leon wuxuu rabay inuu barto sida wax loo kariyo. Daryeelihiisa wuxuu baray sida si badbaado ah loogu isticmaalo istoofka/shooladda wuxuuna u suurageliyay in Leon uu karsado cuntadiisa. Taasi waxay Leon siinaysaa...**

A) Aayo Ka Tashiga
B) Sharafta Khatar Qaadashada
C) Waajibaadka Daryeelka

**7. IBarnaamij taageerada nolosha ah ayaa qofkasta waydiiya wakhtiga ay rabaan inay soo kacaan, cuntada ay jecel yihiin, iyo sida ay rabaan in shaqaaluhu ay ula hadlaan. Barnaamijku wuxuu garowsanayaa xuquuqda deganaha ee...**

A) Aayo Ka Tashiga
B) Sharafta Khatar Qaadashada
C) Waajibaadka Daryeelka

**8. Daryeele ayaa arkay in qof degane ah uusan qaadan daawadiisa dhowr maalmood. Daryeeluhu waa uu ka warbixiyay wuxuuna la xiriiray dhakhtarka qofka. Daryeelaha wuxuu ku dhaqmayaa...**

A) Aayo Ka Tashiga
B) Sharafta Khatar Qaadashada
C) Waajibaadka Daryeelka

**9. Simon wuxuu rabaa inuu saaxiibo la aado ruwaayad xilli dambe habeenki ah. Shaqaalaha taageerada ma jecla fikradda balse wuxuu ka caawiyay inuu isdiyaariyo wuxuuna xaqiijiyay inuu garanayo sida lagu yimaado guriga. Shaqaalaha taageerada wuxuu Simon siinayaa...**

A) Aayo Ka Tashiga
B) Sharafta Khatar Qaadashada
C) Waajibaadka Daryeelka

**JAWAABAHA:**

1. **A - Aayo Ka Tashiga.**
   Maariya waxaa la waydiiyay waxa ay u rabto nafteeda.
2. **C - Waajibaadka Daryeelka.**
   James wuxuu hagaajinayaa dhibaato waxyeellayn karta qof.
3. **B - Sharafta Khatar Qaadashada.**
   Keisha waxay xaq u leedahay inay ballan shukaansi u baxdo, xitaa haddii ay horseedi karto inay waxyeellayso dareemada.
4. **A - Aayo Ka Tashiga.**
   Qorshaha David wuxuu ku salaysan yahay waxa uu rabo inuu sameeyo.
5. **C - Waajibaadka Daryeelka.**
   Daryeeluhu wuxuu xaqiijiyay in Paula ay bannaanka u aadi karto si badbaado ah. .
6. **B - Sharafta Khatar Qaadashada.**
   Leon wuxuu xaq u leeyahay inuu barto xirfad cusub, xitaa haddii uu sameeyo khaladaad.
7. **A - Aayo Ka Tashiga.**
   Barnaamijka wuxuu dadka waydiinayaa waxa ay rabaan iyo sida ay rabaan inay u noolaadaan.
8. **C - Waajibaadka Daryeelka.**
   Daryeelaha wuxuu u tallaabo qaadayaa sababtoo ah caafimaadka daryeelaha ayaa laga yaabaa inuu khatar galo.
9. **B - Sharafta Khatar Qaadashada.**
   Simon wuxuu xaq u leeyahay inuu doorto inuu tago ruwaayadda, xitaa haddii ay leedahay xoogaa khatar ah.

Ma rabtaa inaad waxbadan ka ogaatid sinnaanta iyo u-wada-dhannaanshaha? Iskaangaree sawirka iskaanka ama booqo **TreatPeopleLikePeople.org**